

Waqtiga fulinta gaarsiinta

Gaarsiinta gacan ka saarka ah, waxaa loo samayn karaa oo keli ah, Saacadaha u dhixeyya 7 Subaxnimo iyo 7 Fiidnimo.

Qodobka 106aad

Caddaynta Gaarsiinta

Gaarsiiyaha Maxkamaddu wuxuu dhammaadka dokumentiga asalka ah iyo nuqulka gaarsiinta ku caddeynayaa inuu fuliyey gaarsiinta isagoo dhigaya qoraal taariikh leh, hoostana ka saxiixan.

Qoraalka waa in loogu tilmaamaa si cad qofka loo dhiibay gaarsiinta iyo magaca qofka wax la gaarsiinayo.

Qodobka 107aad

Gaarsiinta Jidka Boostada

Marka Gaarsiinta lagu sameeyo jidka Boostada Rekomandaatada ah, qoraalka waa in lagu dhigaa asaika dokumentiga iyo nuqulkaba, iyadoo la raacinayo baraarujirta ku saabsan helitaanka Dokumentiga asalka ah.

Qodobka 108aad

Ku gaarsiinta ogeysiisyada guud ama jidadka kale

Haddii ay jiraan dhibaatooyin hor istaagaya Gaarsiinta sababtoo ah inay badan yihin dadka gaarsiintu u socoto, ama ay u baahan tahay degdeg aad ah ama asbaab kale oo la garwaaqsan karo, waxaa u bannaan Garsooraha inuu amro in lagu sameeyo Gaarsiinta Jidat ka duwan kuwa lagu caddeeyey qodobbada hore.

MADAXA LABAAD

MUDDOYINKA

Qodobka 109aad

Mummooyinka Sharciga ah iyo Maxkamadaha

Sharciga ama Garsooraha ayaa goynaya mudooyinka lagu qaadanayo tallaabeyinka haddii uusan jirin qodob gaar ahaaneed oo ka mid ah Xeerka,

Waxaa loo qaadanayaa inay muddooyinku caadi yihii haddii uusan Xeerku ku caddayn inay khasab yihii.

Waa bannaan tahay in la dheereeyo muddooyinka caadiga ah, ha-
- veeshee ma bannaana in la dheereeyo kuwa khasabka ah; xataa had-
dii ay isku raacaan dhinacyada.

Qodobka 110aad

Xisaabidda Muddooyinka

Haddii muddadu ku xisaaban tahay maalmo iyo saacado la ti-
rin maayo maalinta ama saacadda muddadu ka billaabanto.

Muddooyinka ku xaddidan bilaha ama sanooyinka waxaa lagu xi-
saabayaa kalandaariyaha caadiga ah.

Maalmaha ciidda ahi waxay ka tirsan yihii muddada.

Maalinta muddada ugu dambaysa haddii ay noqoto fasax waxaa
!oo dheeraynayaa maalinta shaqada ee ka dambaysa fasaxa.

MADAXA SADDEXAAD

BURRINTA TALLAABOOYINKA

Qodobka 111aad

Ku dhawaaqidda burrinta

Laguma dhawaaqi karo dhowrid la'aanta qaabka daraadeed, had-
dii uusan xeerka si cad u sheegin wax taas ka duwan.

Hase yeeshie, waa bannaan tahay ku dhawaaqidda burrinta had-
dii la waayo shardi ka mid shuruudaha qaabka oo lagama maarmaan
u ah gaaridda danta laga leeyahay tillaabada.

Haddiise la gaaro danta laga leeyahay tallaabada marna ma ban-
naanaa in lagu dhawaaqo burrinta tillaabada.

Qodobka 112aad

Ku doodidda duridda iyo saxiddeeda

Ma bannaana ku dhawaaqidda burrinta uusan dhinac ku doodin,
haddii uuna sharcigu u oggolayn Maxkamadda inay ku dhawaaqdo
burrinta.

Waxaa ku doodi kara burritaanka qofka dantu ugu jirto oo keliya.

Burritaanka kuma uu doodi karo qofka sababay ama ka tanaas-
lay.

— 806 —

Qodobka 113aad

Burritaanka ku saabsan dhismaha Maxkamadda
iyo ka qaybgalka Xeer Ilaaliyaha

Ma bannaana saxidda burritaanka ku saabsan dhismaha Maxkamadda iyo ka qaybgalka Xafiiska Xeer—Ilaaliyaha; wa-xaana Maxkamadda waajib ku ah inay ayadu soo jeediso.

Qodobka 114aad

Ballaarinta burritaanka

Haddii la caddeeyo burritaanka tillaabo, waxaa ka dhalanaya inay buraar tillaaboo yinka ka dib la qaadanayo ee la xiriira tiilaabada la burriyey.

Qodobka 115aad

Burrinta Gaarsiinta

Gaarsiinta wax kama jiraan haddii ay jirto garasho la'aan dhan oo ku saabsan qofka gaarsiinta u socoto, ama taariikhda.

Qodobka 116aad

Cusboonaynsiinta warqadda la burriyey

Garsooraha ku dhawaaqa burrinta waa inuu amraa haddii ay suurtowdo cusboonaynta warqadaha la burriyey.

Isla go'aankaas garsooruuhu wuxuu kor saarayaa qofka mas'uulka ka ah burritaanka kharajka cusboonaynta warqadaha.